Somali Cultural Center
Darul Quba
Masjid, Madrasa, Library
1511 4th Street, Minneapolis, MN 55454
P.O.Box 583472 Minneapolis, MN 55458
Tel: (612) 332-0104

CADADADKAN IYO KUWII KA HOREEYEYBA KA AKHRISO www.shaaficiyah.com www.allahlusunnah.com www.allsomali.com

Abriil 6, 2007
Volume 2, Issue 6

# Lamahuraan

## *Beri samaadkii Maxaynu uga baydhnay?*

*Lamahuraan wuxuu ka turjumayaa dhab ahaan wixii tegey iyo turjumaada khaldan ee laga bixiyey Diintan aynu aaminsanahay.*

*Wuxuu baraarujinayaa inta caqliga wax ku miisaanta si ay bal isbarbardhig ugu sameeyaan waxa loo sheegayo iyo waxa saxda ah ee kutubta ku qoran.*

*Tusmada joornaalka*


| | |
|---|---|
| Berisamaadkii | 1 |
| Berisamaadkii | 2 |
| Kalabax | 3 |
| Wahaabiya | 4 |
| Wahaabiya | 5 |
| Culumada | 6 |
| Ma ogtahay | 7 |
| Adeegga | 8 |


**Wuxuu soo bixidoonaa JIMCAHA u horeeya ee BIL walba.**

**XUSUUSNOW! HA IGU TUURIN QASHINKA AAYADO QUR'AAN AH AYAA IGU QORANE!**

## Sidee Xafladda Mowliidka loo qabtaa?

Marka walaalayaal sida aad ogtihiin mowliidka Nabigu waa fal wanaagsan oo waalidiinteenii iyo culumadeennii ay waligood samayn jireen, Soomaaliyana Ilaa maanta waa laga xusaa Nabiga dhalashadiisa, waligeedna waa laga xusi jiray intii aanay imaan Wahhaabiyada shaqada ka dhigatay kufrinta dadka iyo caayda Nabigeenna calayhi as-salaam.

Waxaa kale oo walaalayaal loo baahanyahay in aan fahamno waxa laga wado Xuska Nabiga. Ujeeddadu ma aha in la isu yimaado oo music la shito la niikiyo ama la ciyaaro ama la qaylsho, badar iyo cuntana la iska badsho.

Mowliidka nabiga sida muslimiinta oo dhan yeelaan oo aan ku aragnay Soomaaliya iyo meelo kale sida Jordan iyo Suriya iyo waddama kale oo badan, waa xaflad lagu maamuusayo laguna xasuusanayo dhalashadii Nabigeennii Sharafta badnaa Nabadgelyo iyo Naxariisi korkiisa ha ahaatee, waxyaabaha xafladdaas lagu samaynayo sida uu inoo sheegay Imaam Sayuudi waa: .

1. In la jeedsho duruus ku saabsan siiradii Nabiga oo dadka la xasuusiyo sida ay lagama maarmaanka u tahay barashada siirada Nabigeenna iyo barashada Diinta Islaamka ah ee Nabigu inoo keenay.
2. In laga sheekeeyo Siirada nabiga iyo dhalashadiisii iyo sidii xaalka carabtu ahaa inta uusan Nabigu soo bixin iyo mucjisooyinkii la arkay kolkii uu dhalanayay Nabigu.
3. In la xasuusiyo dadka isu imaanaya sida ay lagama maarmaanka u tahay ku dhegganaashaha Diinta Islaamka iyo qabsashada Kitaabka iyo Sunnada uu inooga tegay Nabigeennu uuna yiri haddii aad labadaa aan idinkaga tegay qabsataan waligiin lumi maysaan gadaasheyiga.
4. In looga digo Muslimiinta meeshaa imaanaya, fasahaadka kooxaha bidciga ah ee lunsan sida "Wahhaabiyada" ee diidaya fadliga Nabigeenna, caayayana Nabiga ee leh Nabigu qiime malaha, boostaale ayuu ahaa, sida uu ku andacooday Sheekhoodii hore, Maxamad bin Cabdul Wahhaab.
5. In la muujiyo farxad iyo raynrayn iyo isku duubni oo la iloobo wixii khilaaf ah ee dhexyaalla umadda Islaamka ah, Isla markaana la iscafiyo.
6. In la siiyo waxii deeq ah ama cunto ah ee la heli karo dadka xafladdaas isugu imaanaya.
7. In aanan wax xumaan ah ama Islaamka khilaafaya halkaa laga samayn.
8. Waxaa bannaan in la qaado Heeso ama Gabayo ama Buraanburro Nabi ammaan ah, waana in aan lagu xedgudbin ammaanta Nabiga oo aan la dhihin wuxuu ogyahay Qaybka iyo waa inankii Ilaah iwm.
9. In aan waqti badan lagu lumin xafladda oo kolkii ay duruusta siirada iyo wacdiga iyo heesaha ama gabayada ama buraanburrada Nabi ammaanka ahi dhammaadaan oo wax la cuno markiiba si tartiib ah loogu kala tago goobta.
10. In la badsho salliga nabiga inta goobtaa la joogo iyo marka laga tago intaba.

QOF WAHAABI AH MOOYEE QOF KALE DIIDI MAAYO MOWLIIDKA! DALIISHOODUNA WAA INAY SHEEGAAN WAXA AY CULUMADOODU KA TIDHI MOWLIIDKA! WAA YAABE MUSLIMKA CULUMADISII, MUFTIYADISII, IMAAMYADISII AAWAY! Waa uun Ibnu baz, Cutheymiin, Al-Jazairi, Ibnu Fowzaan! Aaway Culumadii Islaamka! Bal adba!